Xeerarka Shaqada ama Hawlaha ee OHP:

Waxaan helaa caawimo ku saabsan hawlaha maalinlaha ah. Xeerarka cusub ee shaqada ama hawlaha ee OHP ma i khuseeyaan?

Jawaabta Kooban

Maya. Haddii aad gobolka Oregon ka hesho adeegyo iyo taageero muddo dheer ah oo kaa caawiya hawlaha maalinlaha ah, waa lagaa dhaafay.

Ka-dhaafitaanka micnahiisu waa inaadan u baahnayn inaad buuxiso xeerarka shaqada ama hawlaha.
Uma baahnid inaad ogaato barnaamijka OHP ee aad ku jirto. Gobolka Oregon ayaa dib u eegi doona macluumaadkaaga wuxuuna kuu soo diri doonaa ogeysiis.

Xaashidan waxay ku saabsan tahay oo keliya xeerarka shaqada ama hawlaha ee OHP. Isbeddello kale ayaa saamayn kara OHP. Akhri ogeysiis kasta oo aad hesho si aad u ogaato in isbeddel kale uu ku khuseeyo.

Waa maxay adeegyada iyo taageerada muddada dheer?

Adeegyada iyo taageerada muddada dheer waxay dadka ka caawiyaan hawlaha maalinlaha ah sababo la xiriira da'dooda, naafonimadooda ama baahiyahooda caafimaad awgood. Waxaad adeegyadan ka heli kartaa:

- Gurigaaga.
- Guri daryeel oo dadka waaweyn lagu xannaaneeyo ama guri kooxeed.
- Xarun nolol-maalmeedka laga caawiyo ama xarun daryeel oo la deggan yahay.
- Xarun lagu bixiyo daryeelka xusuusta ama xarun lagu bixiyo daryeelka kalkaalinta.

Waxaad sidoo kale yeelan kartaa maamule kiis, isku-duwaha adeegyada ama wakiil shaqsiyeed oo kaa caawiya qorshaynta adeegyadaada.

Miyey adeegyadaydu isbeddeli doonaan?

Xeerarka shaqada ama hawlaha ma go'aamiyaan mana keenaan wax isbeddel ah oo ku yimaada caawimada aad u hesho hawlahaaga maalinlaha ah.

Haddii mid ka mid ah adeegyadaada isbeddelo, waa inaad heshaa ogeysiis gaar ah.

OREGON DEPARTMENT OF Human Services | OREGON HEALTH AUTHORITY | Oregon HEALTH PLAN

Xeerarka Shaqada ama Hawlaha ee OHP:

Waxaan helaa caawimo ku saabsan hawlaha maalinlaha ah. Xeerarka cusub ee shaqada ama hawlaha ee OHP ma i khuseeyaan?

Sidee ayuu gobolku ku ogaan doonaa baahiyahayga?

Gobolku wuxuu isticmaali doonaa macluumaadka uu hore u hayay marka ay suurtagal tahay. Haddii loo baahdo macluumaad dheeraad ah, waxaad heli doontaa ogeysiis sharxaya waxa aad soo gudbinayso iyo wakhtiga ugu dambeeya ee la soo gudbinayo.

Waxaad soo gudbin kartaa macluumaadka:	Maxaan sameeyaa?
• Onlayn adigoo adeegsanayo barta benefits.oregon.gov. • Adigoo isticmaalaya app-ka bilaashka ah ee Oregon ONE Mobile. • Adoo soo wacayo 800-699-9075. Wicitaannada gudbinta waa la soo dhawaynayaa. • Xafiiska ODHS ee Deegaanka.	• Akhri ogeysiis kasta oo aad hesho. • Hubi in cinwaankaaga, lambarka taleefankaaga iyo iimaylkaagu ay yihiin kuwa aad hadda isticmaalayso. • Dhammaystir cusboonaysiinta OHP-gaaga ugu dambayn taariikhda ku qoran ogeysiiskaaga. • Ka jawaab haddii lagu weydiiyo macluumaad dheeraad ah. • Codso caawimo haddii ay kugu adag tahay inaad fahanto ogeysiiska ama aad ugu baahan tahay luqad kale ama qaab kale.

OREGON DEPARTMENT OF Human Services | OREGON HEALTH AUTHORITY | Oregon HEALTH PLAN

Xeerarka Shaqada ama Hawlaha ee OHP:

Waxaan helaa caawimo ku saabsan hawlaha maalinlaha ah. Xeerarka cusub ee shaqada ama hawlaha ee OHP ma i khuseeyaan?

Halkee ayaan ka heli karaa caawin?

Su'aalaha ku saabsan u-qalmitaanka OHP ama xeerarka cusub:	Ka wac Xarunta Adeegga Macmiilka ee ONE lambarka **800-699-9075.**
Su'aalaha ku saabsan adeegyadaada naafonimada:	La xiriir maamulaha kiiskaaga, isku-duwaha adeegyada, wakiilkaaga shaqsiyeed, barnaamijka adeegyada naafonimada ee deegaankaaga, xafiiska Adeegyada Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Naafada ah, ama xafiiska Hay'adda Deegaanka ee Dadka Waayeelka ah. Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Xarunta Xiriirka Khayraadka Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Naafada ah lambarka **855-673-2372.**

Ma aha inaad keligaa arrintan xal u raadiso. Qof kaa caawiya adeegyadaada ayaa kaa caawin kara inaad hesho meesha saxda ah ee aad wacayso.

Wax badan ka ogow barta: https://OHP.Oregon.gov/HR1

Waxaad dukumeentigan ku heli kartaa luqado kale, far waaweyn, farta indhoolayaasha ee Braille ama qaab aad doorbidayso, adigoon wax lacag ah bixin. Kala xiriir OHP one.communications@odhsoha.oregon.gov.